NUQULKA HORDHACA AH EE NIDAAMKA CABASHADA:

Nidaamka Cabashada

Shaqaalahayagu waxay helaan tababar joogta ah iyo macluumaad ku saabsan is dhexgalka booqdayaasha naafada ah, oo waxaanu ku dedaalnaa inaanu samayno waayo aragnimada suuragalka ah ee ugu wanaagsan ee dhammaan dadka booqdayaasha ah.

Si wax looga qabto walaacyada ku saabsan waayo aragnimadaada madxafka, fadlan raac nidaamka cabashada ADA (samee linkiga bogga nidaamka Cabashada). Macluumaadkan sidoo kale waxaa lagu heli karaa Hmong, Soomaali, iyo luqaddaha Isbaanishka.

Intaa waxa dheer, waxaanu ku dedaalnaa si aanu uga dhigno adeegyadayada, barnaamijyada, iyo hawlaha kuwa ay heli karaan booqdayaasha leh ku wanaagsanida xadidan ee Ingiriisiga (LEP). Si looga hadlo walaacyada la xidhiidha caawimada luqadda fadlan raac nidaamaka cabashada ee hoose. Macluumaadkan sidoo kale waxaa lagu heli karaa Hmong, Soomaali, iyo luqaddaha Isbaanishka.

Goobta Websaydka SMM:

smm.org/visit/accessibility-amenities

NUQULKA NIDAAMKA HABKA CABASHADA ADA:

Waa xeerka Madxafka Sayniska Minnesota inaan wax lagu takoorin qaab ku salaysan naafanimada. Madxafka Saynka ee Minnesota waxa uu qaatay nidaamka cabashada gudahaee siinaya xalka degdega ah iyo ka sinanta leh ee cabashooyinka ku andacoonaya fal kasta oo lagu mamnuucay Qaybta 504 ee Xeerka Dib u dejinta ee 1973 (29 U.S.C. 794) ee. Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Aadamaha shuruucda fulinaysa Xeerka.

Qaababka Cabashadu ku salaysan tahay

ADA waxay sheegtay “ma jiro qof u qalma naafanimooo, sabab kasta oo naafanimadan ah, laga reebayo ka qayb galka gudaha ama loogu diidayo dheefaha adeegyada, barnaamijyada, ama hawlaha urur dad wayne, ama uu kula kacay takoor ururkaasi.” Qof kasta oo rumaysan iyada ama isaga in lagula kacay takoor qaab ku salaysan naafada waxa uu soo gudbin karaa cabasho. Waxay ka soo horjeedaa sharciga Madxafka Sayniska ee Minnesota in laga aargoosto qof kasta oo soo xareeya cabashada ama la shaqeeya baadhitaanka cabashada.

Sida loo Gudbiyo Cabashada

Qof kasta oo rumaysan iyada ama isaga in lagula kacay takoor qaab ku salaysan naafada waxa uu soo gudbin karaa cabasho. Cabashooyinka waa in lagu hagaajiyaa Ronda Maurer- Maamulaha Xidhiidhada Booqdaha, taas oo loo xilsaaray inay isku duba rido dedaalalda Madxafka Sayniska ee Minnesota si loogu hogaansamo Qaybta 504. Waxaad ku soo gudbin kartaa cabasho qof ahaan xaga miiska Xubinta gudaha hoolkayaga ama addoo la soo xidhiidhaya isku duwaha oo soo maraya qaababkan.

Sku duwaha Qaybta 504 - Madxafka Sayniska ee
Minnesota Ronda-Maamulaka Xidhiidhada Booqdaha
Limaylka: info@smm.org
Boostadda: 120 Kellogg Blvd W., St. Paul, MN 55102 Telefoon: 651-221-4583

Nidaamka Cabashada:

1. Cabashooyinka waa in loo soo gudbiyaa Isku duwaha Qaybta 504 15 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda qofka soo xaraynaya cabashadu uu ogsoonaado falka takoortka ah ee la soo oogayo.

2. Cabashada waa inay qoraal ahaataa, oo ka koobnaataa magaca iyo cinwaanka qofka soo xaraynaya. Cabashadu waa inay sheegtaa dhibaatada ama falka lagu eedaynayo inuu yahay mid takoorida ah iyo xalka ama dejinta la raadiyay.

3. Sku duwaha Qaybta 504 (ama qofkeeda/kiisa loo xilsaaray) waxa uu qaban doonaa baadhitaanka cabashada. Baadhitaankan waxay noqon karaan kuwa aan rasmi ahayn, laakiin waa inay dhammaystirnaataa, iyaddoo siinaysa dhammaan dadka xiisaynaya fursada lagu gudbiyo caddaynta la xidhiidha cabashada. Isku duwaha Qaybta 504 waxa uu hayn doonaa faylasha iyo diiwaanada Madxafka Sayniska ee Minnesota ee la xidhiidha cabashooyinkaas.

4. Isku duwaha Qaybta 504 waxa uu soo saari doonaa go'aanka qoran ee cabashada wakhti aan ka dambayn 30 maalmood ka dib soo xaraynta.

5. Qofka soo xaraynaya cabashada waxa uu rafcaan ka qaadan karaa go'aanka Isku duwaha qaybta 504, warqad u qorida Sarkaalka Madaxa Hawl fulinta 15 maalmood gudahood marka la helo go'aanka Isku duwaha Qaybta 504. Sarkaalka Madaxa Hawl fulinta ayaa soo saari doono go'aanka qoran ee jawaabta u ah rafcaanka wakhti aan ka damabayn 30 maalmood ka dib marka la soo xareeyo.

6. Helitaanka iyo isticmaalka nidaamka cabashada kama hor istaago qofka inuu soo xareeyo cabashada takoorka ee ku salaysan naafada gudaha Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Aadamaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah.

Madxafka Sayniska Minnesota waxa u samayn doontaa habbaynta habboon si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah la siiyay habbayn kale haddii loo baahdo inay ka qayb galaan nidaamka cabashada. Habbaynta waxaa ka mid ahaan kara, laakiin kuma koobna siinta turjubaano qofka dhegoolaha ah, siinta cajalado duuban oo ah agabka indhoolaha, ama xaqiijinta goob aan caqabad lahayn ee nidaamka marka uu socda ah. Xarunta Sayniska ee Minnesota waxa uu bixin doonaa habbaynahan macquuqlka ah iyaddoo ay keenayaan culays dhaqaale oo maamuleed mooyaanee ama ay ku sameeyaanbeddelaa muhiim ah sifada barnaamijka ama hawsha. Haddii habbaynta la codsaday ay keento culays aan la filayn ama ay samayso beddelaad aasaasi ah, Xarunta Sayniska Saint Louis waxay isku deyi doontaa inay soo jeediso xalalbeddel ah iyo/ama habbayno aan abuurin dhibtaas ama aan samayn beddelkaas. Xarunta Sayniska ee Saint Louis waxay kula shaqayn doontaa kalsooni wanaagsan qofka codsanaya habbaynta si loo go'aamiyo helitaanka beddel la aqbali karo. Iskuduwaha Qaybta 504 waxa uu ka masuul ahaan doonaa qaban qaabintan.